IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad — Muqdisho, 7 Disember 1976, 1.r.12

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 26 EE 27 JUN. 76, *BILLAD — GESSIDA Umadda Soomaaliyeed.* Gogga 947

SHARCI L. 27 EE 27 JUN 76, *ASTAAN XUSUUSTA Asaasayaasha Xisbiga H. K. Soomaaliyeed.* Bogga 949

SHARCI L. 28 EE 27 JUN. 76, *Billada Abaabulayaashii Kacaanka 21 Oktoobar 1969 ee Hantiwadaagga.* » 950

### BOGGA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA G.S.K. EE 15 MAAJO 75, *ku Maamuusid Billadda Dahabka ee Kacaannimo Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka L. 94* » 952

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. EE 30 JUN. 76, *Magacaabid ku xigeennada Duqa Magaalada Muqdisho L. 95* » 953

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. EE 30 Juun. 76, *Magacaabid Agaasimayaal L. 96* » 955

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. EE 30 Juun. 76, *Toosin Jago L. 97* » 957

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. EE 10 Dis. 75, *Bed-delaad Laba—Xiddiglayaal ka tirsan Ciidanka Boolis-ka L. 98* » 959

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. EE 20 Nof. 76, *ma-gacaabid Guddiga Xeer Ddejin iyo latashiga L. 99* » 960

---

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

## BOGGA SADDEXAAD

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 18. 08. 76; *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 426* » 962

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 28. 09. 76, *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 427* » 963

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 04. 10. 76, *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 428* » 964

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 24. 10. 76, *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 429* » 965

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 29. 10. 76, *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 430* » 966

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA, 11. 11. 76, *Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad. L. 431* » 967

MAXKAMADDA GOBOLKO BANAADIR, 8.12.76, *Lu-mid Jeegga Wareega Lam. 19682 ku qoran Sh.SO. 2.000, uu leeyahay Cabdi Salaad Shongole L. 432* » 968

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 13.1276, *Lu-mid Buug. Kaydka Lam. 3706 ku qoran Sh.SO. 4032/70 uu leeyahay Xaaji Cumar Barow L. 433* » 969

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 11.12.76, *Lu-mid Buug. Kaydka Lam. 5737 ku qoran Sh.SO. 12.012.70 uu leeyahay Maxamuud Diiriye Muuse L. 434* » 970

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 16.12.76, *Buug, Kaydka Lam. 10539 ku qoran Sh.SO. 4.4.00, uu leeyahay Aadan Xasan Cabdi L. 435* » 971

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 20kii Juun, 1976, Lumid Jeegga wareega L. 09198, ay leedahay Xaajiya Cutiya Mire Sugulle L. 436 » 973

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 26 ee 27 Juun. 76, Billad Geesiga Ummadda Soomaaliyeed.

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOMIYEY

SHARCIGA SOO SOCDA.

### Qodobka 1aad

Waxaa la abuuray Billad Dahab ah oo ku magacaaban: Billad-Geesiga Ummadda Soomaaliyeed.

### Qodobka 2aad

Billad—Geesiga Ummadda Soomaaliyeed waa heerka ugu sarreeya Abaalmarinta Qaranka ee qof la siiyo, waxaana lagu mutaysan karaa u huritaanka amase halis weyn u gelinta nafta danaha Qaranka, soo hoyn Guul taariikh reebta, ka badbaadin Qaranka khatar weyn.

### Qodobka 3aad

Billaddu waxay ka kooban tahay Xiddig Shan gees leh, dhexroorkiisu yahay mm. 36. Xiddiggu wuxuu ka lushaa Silsilad ka lalmata leydi Dahab ah oo Midabkiisu Guduud yahay, ayna ku qoran tahay oraahda: Geesiga Ummadda Soomaaliyeed.

### Qodobka 4aad

1) Bixinta Billaddan waxaa Guddoomiya Guddiga Siyaasadd ee Golaha Dhexe XHKS, waxaana lagu soo saarayaa dekreeto uu saxiixo Madaxewynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

2) Sidoo kale bixinta Billadda waxaa Guddoomin kara Shirweynaha Xisbiga.

### Qodobka 5aad

Billaddu waxay leedahay Shahaado ay ku qoran tahay sababta lagu bixiyey oo kooban.

Qodibka 6aad

Billaddu waa shakhsi, xuquuqda ay leedahayna la iskama dhaxli karo, qofka muttystana wuxuu xaq u leeyahay:

b) Taalla xusuuseed oo loo dhiso dhimashadiisa kaddib;

t) Ku Magacaabid meelo caam ah (Magaalo, Dugsi, Isbitaal, Jid iwm);

j) Xushmad iyo horumarin gaar ah xagga hahmaamuuska;

x) Kharaj la'aan Gaadiidka Dawladda, Hoteellada Dawladda iyo meelaha caamka ah;

iih) Xannaano naftiisa markuu hawl gabo oo ay ka mid tahay: hoy, Gaadiid iyo Gunno ku filan;

d) Xannaano qoyskiisa aan tabar galka ahyan.

Qodobka 7aad

Maamulka iyo keydka Billadaan waxay raacayaan habka Billadaha Sharafta ee lagu jideeyey Sharciga tirsigiisu yahay 65, soona baxay 19kii Oktoobar 1970.

Qidobka 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gtlayaa mar alla markii uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 27.6.1976

GUDDOOMIYAHA GOLAHA S. K.
*(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI L. 27 ee 27 Juun. 76. Astaanta xusuusta Aasaasayaasha Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed.

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha;

ARKAYNA inay tahay lagama maarmaan in looga reebo xusuus dadweynaha Soomaaliyeed ee lahaa Shaqaale, Arday, Culimaa'uddiin,

Ciidammada Qalabka Sida, Guulwadayaal, Ganacsato yaryar. Indheer garato, Beeraley Xoola raacato, ka qayb galkii Shirweynaha Aasaasicda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU GUDDOMIYEY

SHARCIGA SOO SOCDA.

Qodobka 1aad

Waxaa la dhisal Astaan xusuusta Aasaasayaasha Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Astaantu waxay ka samaysan tahay Macdan aan mirireynin, waxayna ka kooban tahay calaamadda Xisbiga oo halka hoose ay uga qorn tahay erayga: Aasaasayaasha.

Qodobka 3aad

Astaan waxaa bixinaaya Xoghayaha Guud ee XHKS, waxaana la siin karaa oo keliya jaalayaasha ka qayb galay Shirweynaha Aasaaska Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed.

Qiaobka 4aad

Dadka la siiyey astaanta waxaa ku waajib ah inay soo xirtaan markuu jiro bannaanbaxyo iyo shirar Xisbigu qabanqaabiyey.

Qodobka 5aad

kaydka Billadahn iyo diiwaan gelintooda waxaa leh Xisbiga.

Muqdisho, 27 Juun 1976,

GUDDONSHAHA GOLAHA S. K.
*(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI L. 28 ee 27 Juun. 76, Billada Abaabulayaashii Kacaankii 21ka Oktoobar 1969 ee Hantiwadaagga.

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

SHACIGA SOO SOCDA:

SHARCIGA SOO SOCDA.

Qidobka 1aad

Waxaa la dhisay Biladda Abaabulayaashii Kacaankii Soomaaliyeed ee 21ka Oktoobar 1969 ee Hantiwadaagga.

Qodobka 2aad

Billadda nooceedu waa dahab, waxayna leedahay tilmaamaha soo socda:

Qaabka Billaddu waa goobo dhexroorkiisu yahay mm. 32.

Wejiga hore waxaa ku sawiran gacan shanteeda farood ay taagan-yihiin.

Gacanta waxaa ka hooseeya oo ku gudban qori soor baxsan, ba-ridiisuna jirto dhanka hoose ee midigta (marka surto), caaradda soor-kuna xagga sare ee bidixda. Qoriga waxaa ka saaran abbaarka ridaha Koofiyadda Digaalka ee Ciidammada (Elmett), dhammaantoodana waxay cuskan yihiin Kitaab Quraan ah oo furan. Isla wejiga waxaa halka sare ugu qoran, lana wareegsan qaabka Billadda, oraahda: Jam-huuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya — Abaabulayaashii Kacaankii 21kii Oktoobar 1969, ee Hantiwadaagga.

Wejiga danbe waxaa ku yaal Astaanta Jamhuuriyadda Dimuqraa-diga Soomaaliya.

Billaddu waxay ka lulataa Xaasow ka kooban saddex Midab isle'eg: laba jiitin guduud ah oo xigta dhinacyad iyo jiitin Bulug ah oo u dhe-xeysa.

Billaddu waxay kaloo leedahay Xaasow yar nooca Ciidammada Qalabka Sida oo leh isla midabka kor lagu tilmaamay, waxayna dhex-dhexaadda ku wadataa xiddig yar oo dahab ah.

Qodobka 3aad

Billaddan waxaa la siin karaa Xildhinaannada G.S.K. oo toddoba-dii sano ka horreeyey aasaasidda XHKS ku shaqeeyey naf—hurnimo, una ahaa horseedka tallaabooyinkii dhaadheeraa ee laga qaaday xagg bulshada dhisiddeeda, dhaqaalaha korintaasa iyo Siyaasad horusocod ah ku maamulkeeda danaheenna Gudaha iyo xiriirkeenna Dibedda, kuna soo gudbey muddadaas sharafta iyo dadaalka joogtada ah, iyagoon ku kicin khiyaano, Foolxumo ama wax danta Ummadda Dhabar jab u ah.

### Qodobka 4aad

Bixinta Billaaddaan waxaa Guddoominaayo Shisweynaha aasaasidda XHKS, waxaana lagu soo saarayaa Dekreeto uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

### Qodobka 5aad

Billaddu waxay wadataa Shaaado ay ku qoran tahay sababta lagu bixiyey oo koobar.

### Qodobka 6aad

Billaddu waa shakhsi, Xushmadda ay leeoahayna la iskama dhaxil karo, dadka la siiyeyna waxay u aqoonsanaysaa xuquuqda soo socota:

b) Xushmad iyo hormarin xagga Habmaamuuska;

t ) Kharaj la'aan gelidda meelaha caamka ah;

j ) Ka dhimid boqolkiiba konton (50 %) Gaadiidka iyo Hoteellada Dawladda;

x) Xannaano naftiisa markuu hawl gabo oo ay ka mid tahay: Hoy, Gaadiid Cunno ku filan;

kh) Xannaano Qoyskiisa aan tabar galka ahayn.

### Qodobka 7aad

Maamulka iyo kaydka Billaddahan waxay raacayaan habka Billadaha ee lagu jideeyey Sharciga Abaalmarinta Sharaf (Xeer L. 65 ee 19kii Oktoobar 1970).

### Qodobka 8aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa mar alla markuu saxiixo Madaxweynha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 27.6.1976,

GUDDOMIYAHA GOLAHA S. K.
*(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**BOGGA LABAAD**

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GSK, ee 15 ku maamuusid Billadda Dahabka ah ee Kacaanka. L. 94

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Lam. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga Lam. 65 ee 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka oo ku qotomay socodsiinta talada Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed, ahaana in Magaca Dhallinyarada lagu siiyo Guddoomiyaha G.S.K Billadda Dahabk ah ee Kacaannimada;

MARKUU ARKAY Inay tahay lagama maarmaan meelmarinta talada Dhallinyaradu;

WUXU GUDDOMIYEY

XEERKA SOO SOCDA

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay Guddoomiyaha GSK, Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, Billad Dahab ah ee Kacaannimo.

Muqdisho, 15.5.1975.

GUDDOMIYAHA GOLAHA S. K.
*(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA EE 30 Juun. 1976 Magacaabid ku xigeennada Duqa Magaalada Muqdisho L. 95

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaan 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee sz baxay 8dii Juunyo 1972kii; kaasoo lagu dhisay maamulka Dawladda Hoose;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 28 ee soo baxay 21kii Febraayo 1976, kaasoo lagu dhaqo Shaqaalaha Dawladda Hoose ee Xamar.

MARKUU ARKAY: Tala jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Maqaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Laga billaabi 1da Juunyo 1976ka in jaalayaasha hoos ku qoran oo ka mid ah Shaqaalaha Dawladda hoose ee Xamar lagu magacaabo ku Xigeennada Duqa Maqaalada Muqdisho, lana siiyo qofwalba jagada ku rof qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Jaalle Dr. Maxamuud Xaaji Salaad | 10001 |
| 2) | Jaalle Dr. Maxamuud Maxamed Culusow | 20001 |
| 3) | Jaalle Maxamed Maxamuud Cumar | 40001 |

Qodobka 2aad

Jaalayaashaas derajadoodu waxay noqoneysaa, kuna mushaar qaadanayaan A3 Bilaw ah.

Qodobka 3aad

Waxay xaq u yeelanayaan Gunno jago oo ah Sh.SO. 800/= iyo Gunno aqal oo ah Sh.SO 300/= Bishiiba.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Juun. 1976,

*Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka*
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

GUDDOMIYAHA GUDDIGA KACAANKA
ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada
(Jaalle Fuusuf Ibraahim Aburaas)

XEER Madaxweynaha G. S. K. 20 Nof, 76, Magacaabid Agaasimayaal L. 96

# G U D D O O N S H A H A

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 52 ee soo baxay 8dii Juunyo 1972kii, kasoo lagu dhisay maamulka Dawladda Hoose.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam yahay 28 ee soo baxay 21kii Febraayo 1976, kaasoo lagu dhaqo Shaqaalaha Dakladda Hoose ee Xamar.

MARKUU ARKAY: Tala jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadid ahna Duqa Maqaalada Muqdisho.

## WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

### Qodobka 1aad

Laga billaabo 1da Luulyo 1976ka in Jaallayaasha hoos ku qoran oo ka mid ah Shaqaalaha Dawladda Hoose ee Xamar lagu magacaabo Agaasimayaal Buuxa, lana siiyo qofwalba jagada ku hoos qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1) | Jaalle Cali Xaaji Muuse Ciise | 20479 |
| 2) | Jaalle Ruqiya Xuseen Cali | 10005 |
| 3) | Jaalle Axmed Maxamed Xuseen | 20004 |

4) Jaalle Shariif Maxamed Carraale 20080
5) Jaalle Maxamuud Cilmi Cali 20147
6) Jaalle Cabdi Khaliif Dalmar 30004
7) Jaalle Abshir Maxamuud Cilmi 30634
8) Jaalle Ar. Maxamed Cali Siise 40055
9) Jaalle Cabdullaahi Sheekh Cali 40004
10) Jaalle Aamed Xaaji Maxamuud Jaamac 40362
11) Dr. Maxamed Sheekh Iikar 40729
12) Jaalle Cabdi Yuusif Ducaale 40962

Qodobka 2aad

Jaallayaashaas derajadoodu waxay noqonaysaa, kuna mushaar qaadanayaan A3 billow ah.

Qodobka 3aad

Waxay xaq u yeelanayaan Gunno Jago oo ah Sh. SO. 400 iyo Gunno Aqal oo ah Sh. SO. 300 Bishiiba.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuuna ku soo baxayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Juun. 76,

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho
(Jaalle Yuusuf Ibraahim Aburaas)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay Diiwaanka Lam. 4 Bogga Lam. Muqdisho 13. Luulyo 1976
Hantidhawrka Guud
(G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 30 Juun, 1976, Toosin Jago L. 97

## G U D D O O N S H A H A

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam yahay 121 ee 17.9.1972kii;

ISAGOO ARKAY; Xeerka Lambarkiisu yahay 28 ee 21.2.1976, laguna dhaqo Shaqaalaha dawladda Hoose;

ISAGOO TIXGELINAYA: Tala jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Xamar;

IYADOO MUUQATA; in jagada Xoghayaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Lam. yahay 029 ee ku xusan Sharciga dhismaha Shaqaalaha Dawladda Hoose, ay muujinayso garaado ah A.6 oo ka heer hooseeya mida uu Sharci ahaan Xoghayaha Gobolku leeyahay.

IYADOO LA AIXGELINAYI: mudnaanta garaadada uu Xoghayaha Gobolku Sharci ahaan noqon karaa heer Agaasime A.3

IYADOO LA AQOONSADAY in garaadada ah A.6 ay la siman tahay heer madax Faraca, ayna lagama maarmaan tahay in la toosiyo.

## X E E R. I B N

### Qodobka 1aad

Ayaa waxaa u xeeriyey in jagada 028 loo toosiyo garaadada ah A.3.

Qidobka 2aad

In xoghayaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir Jaalle Xasan Xaaji Maxamuud uu noqon doono kuna Lacag qaadan doono darajada ah A.3.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa Marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuuna ku soo baxayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, Juun, 1976,

Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada
Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali Abu—Raas

Waan aragnay ee DiiwaangelinayDiiwaan Lam. 4 Bogga Lam 58. Muqdisho 13 Luulyo 1976
Hntiahawrka Guud
G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

XEER GUDDOONSHAAH GOLAHA SARE EE KACAANKA 10.12.75
Beddelid Laba—Xiddiglayaal L. 98

## G U D D O O N S H A H A
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Lam. 190/Qar, taariikh 17.11.1975 ee Wasaaradda Beeraha tan Ciidammada Qalabka Sida 43-200 taariikh 20.11.1975 kuna saabsan laba Xiddiglayaasha ee hoos ku qoran;

ISAGOO ARKAY: Warqadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka. ee ku lambarsanayd GSK/S/ 13.A-1447 ee 4.12.1975.

ISAGOO TIXGELIYEY: baahida in Saraakiishaas lagu wareejiyo Wasaaradda Beeraha — Ururka Ciribtirka ayaxa;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Taladii ay soo jeejiyeen labada Xighaye ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Beeraha;

### WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

In Jaalle Laba—Xiddigle Cabdullaahi Saciid iyo Jaalle Laba—Xiddigle Maxamed Ibraahim laga billaabo 1da Jennaayo 1976, laga Beddelay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed loona beddelay Wasaaradda Beeraha — Ururka Ciribtirka Ayaxa.

### Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaa nalagu dhigi doonaa Fiifinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisha, 19.12.1975,

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
*Sas. (S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
Sax. S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Beeraha
*Sax. S/Guuto Maxamed Ibraahim Axmed*

Waan aragnay ee Diiwaangelinay Diiwaanka Lam. 7 Bogga Lam. 93 Muqdisho, 4 Dicember 1976
Hantidhawrka Guud
Sas. G/Sare Cabdullaahi Warsame Nuur

XEER WASIIRKA DAWLADDA IYO ARRIMAHA DIINTA 20 Nof. 1976 Magacaabidda Guddiga Xeer Dejinta iyo La—tashiga L.99

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lambarkiisu yahay 61 soona gaxay 10.-3.1975;

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay tahay in la cusbooneysiiyo Guddiga Xeer Dejinta iyo La—tashiga ee xaruntiisu ay tahay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta — Waaxda Xeer dejinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Dekereetadan hoos ku qoran:

Qodibka 1aad

MAGACAABID GUDDI

Waxaa la magacaabay Guddiga Xeer dejinta iyoLa—tashiga oo ay Xaruntiisu tahay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta — Waaxda Xeer dejinta.

Qodobka 2aad

Guddiga wuxuu ka kooban yahay Sharciyaqaannada hoos ku qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Cabdirisaaq Cali Xaaji | Guddoomiye |
| 2. | G/Dhexe Dr. Maxamuud Caseyr | Xubin |
| 3. | Prof. Dr. Maxamuud Cali Daahir «Guure» | Xubin |
| 4. | Dr. Yuusuf Cilmi Rooble | Xubin |
| 5. | Dr. Yaasiin Xaaji Xuseen | Xubin |
| 6. | Dr. Sheekh Aadan Maxamed | Xubin |
| 7. | Dr. Yaslam Cabdalla Saciid | uXbin |
| 8. | Dr. Ibraahim Xaaji Xaashi | Xubin |
| 9. | Dr. Axmed Islaw Cumar | Xubin |
| 10. | Dr. Manjit Singh | Xubin |
| 11. | Cali Axmed Geelle | Xoghaye |

Qodobka 3aad

Baabi'is

Waxaa la baabi'inayaa Guddigii ku soo baxay Xeerka Lam. yahay 61 soona baxay 10.3.1975.

Qodobka 4aad

Dhaqan gelin

Dekreetadan si degdeg ah bay u dhaqan geleysaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho 20 Nofember 1976

WASIIRKA GARSOORKA IYO AR. DIINTA
*(Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEER NIDAAMIYE LAMBAR 94 18.08.1976

UJEDDO: HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

GUDDOOMIYHAA IYO AGAASIMAHA GUUD

EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna bedaelay Sharciga Lam. yahay 8 ee 29kii Oktoobar 1964,
Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha Qalaad ee looguna beddelan kari lacagteenna.
AYAGOO TIXGELIYEY: Isbeddelka qiimaha lacagaha Qalaad ee saameynaya ganacsiga Dunida, sida joogto ahaan naga soo gaartay Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.
MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeenna.
AYAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lr. 214 ee 18.08.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDONSHEEN

In heerka Sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga billaabo 18.08.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyo.

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 11.0283 | 11.2489 |
| DM. | 1.00 | 2.4531 | 2.5022 |
| LIT. | 133.99 | 1.0000 | = |
| LIT. | 131.31 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2490 | 1.2740 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5171 | 2.5674 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

CUMAR AXMED CUMAR
*(Guddoomiyaha)*

Muqdisho, 18.08.1976

*SACIID MAXEMED CALI*
*Agaasimaha Guud*

L. 426

## BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

## XEER NIDAAMIYE LAMBAR 95 EE 28.09.1976

## UJEEDDO: HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

## AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA

## DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY: Qodobka 13aad Xubintiisa Afraad, ee Sharciga Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqan yahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad, Xeerka Lam. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna beddelay Sharciga Lam. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo mar—walba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogana beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha Qalaad ee saameynaya Ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeenna.

ASAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 125 ee 28.09.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

## WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka Sarrifka lacagaha Qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga billaabo 28.09.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UKε | 1.00 | 10.7526 | 10.9676 |
| DM. | 1.00 | 2.5144 | 2.5647 |
| LIT. | 133.99 | 1.0000 | = |
| LIT. | 131.31 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2690 | 1.2944 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5171 | 2.5674 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 30 Juun. 1976,

SACIID MAXAMED CALI
Agaasimaha Guud iyo Guddoomiyaha
Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

L. 427

Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

MARKUU ARKAY: Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqan yahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad, Xeerka Lam. 12 ee 26kii Settember, 1964, Laguna beddlaey Sharciga Lam. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Baahinta Ganacsiga dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo mar walba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu-na beddelan karo lacagteenna.

ISAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saameynaya Ganacsiga Dunida, sida joogta ahaan anga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo Ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeenna.

ISAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 216 ee 04.10.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember,

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata laga billaabo 04.10.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.4300 | 10.6386 |
| DM. | 1.00 | 2.5144 | 2.5647 |
| LIT. | 136.67 | 1.0000 | = |
| LIT. | 133.94 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2690 | 1.2944 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5171 | 2.5674 |
| DJ.FR | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 30 Juun. 1976,

SACIID MAXAMED CALI
*Agaasimaha Guud iyo Guddoomiyaha*
BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

L. 428

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEER NIDAAMIYE LAMBAR 98 EE 29.10.1976.

UJEDDO: XEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY: Qodobka 13aad xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud, markuu maqan yahay Guddoomiyaha.

MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad, Xeerka Lam. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna beddelay Sharciga Lam. 8 29kii Oktoobar 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Baahinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo mar walba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ISAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saameynaya Ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeena.

ISAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 218 ee 29.10.1976, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka Sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadd loogu caddeeyey faafinta rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga billaabo 29.10.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.2736 | 10.4291 |
| DM. | 1.00 | 2.5647 | 2.6160 |
| LIT. | 138.72 | 1.0000 | = |
| LIT. | 135.95 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5549 | 2.6060 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 04191976

SACIID MAXAMED CALI
*Agaasimaha Guud iyo Guddoomiyaha*
*BANKIGA DHEXE EE SOOOMAALIYA*

L. 429

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

XEER NIDAAMIYE LAMBAR 97 EE 24.10.76,

UJEEDDO: HEERKA SERRIFKA LACAGAHA QALAAD.

GUDOOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUDU

DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka Lam. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna beddelay Sharciga Lam. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Baahinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saameynaya Ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeenna.

AYAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 217 ee 24.10.1976 sida Shargica Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GODDOONSHEEN

In heerka Sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna looug caddeeyey faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doona sida hoos ka muuqata, laga billaabo 24.10.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO. AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 7.3573 |
| UK£ | 1.00 | 9.9654 | 10.1647 |
| DM. | 1.00 | 2.5647 | 2.6160 |
| LIT. | 138.72 | 1.0000 | = |
| LIT. | 135.95 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5549 | 2.6060 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho,24.10.1976.

*SACIID AXMED CALI*
*Agaasimaha Guud*

CUMAR AXMED CUMAR
*Guddoomiyaha*
Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

# BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

## XEER NIDAAMIYE LAMBAR 99 EE 11.11.1976

## UJEDDO: XEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA
DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY: Qodobka 13aad Xubintiisa 4aad, ee Sharciga Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, ee awood buuxda siinaya Agaasimaha Guud markuu maqan yahay Gol'aoomiyaha.

MARKUU ARKAY: Qodobka 10aad, Xeerka Lam. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna beddelay Sharciga Lam. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

ISAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaadee saameynaya Ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY: In la daryeelo Ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha Waddankeenna.

ISAGOO OGSOON: In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 219 ee 11.11.1976 sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

WAXAY GUDDOONSHEEN

In herka Sarrifka lacagaha qalaad ee hoos kuqoran, horeyna loogu caddeeyey faafinta rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga billaabo 11.11.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddeyn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Soomaa-

| Lacagta | Qalaad | Heerka Iibsashada OO SH. SO. AH | Heerka Gadidda OO SH. SO AH |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.1647 | 10.3680 |
| DM. | 1.00 | 2.5647 | 2.6160 |
| LIT. | 138.72 | 1.0000 | = |
| LIT. | 135.95 | = | 1.0000 |
| FR.FR. | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.FR | 1.00 | 2.5549 | 2.6060 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

SACIID MAXAMED CALI

*Agaasimaha Guud iyo Guddoomiyaha*

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

Muqdisho, 11.11.1976,

L. 431

## MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDU ARKAY: Qod. 69. D.L. 9.9.65, N.2; iyo Lumidda Jeegga wareega ee Lam. 19682; kuna qornayd Sh. SO. 2.000 iskana lahayd Maxkamadda Gibolka Jubada Dhexe;

### WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo Jeega wareega kaddib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta Dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga W. cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdi Salaad Shongole Guddoomiyaha Maxkamadda ama qof isla isaga ka sita Wakaalad Sharci ah, ayadoo laga sugayo muddada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

MUQDISHO, 8/12|76

GUDDOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 432

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

**HADDUU ARKAY:** dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyi ogeysiiska Bankiga; Ganacsiga Ummadda Laanta Dhexe.

HADDUU AKRAY: qod.69 D. L.9|9/65 N. 2; iyo lumidda buug keydka lam. 3706 oo ay ku qornayd lacag dhan Shs. 4.032,70 ee uu iska lahaa Xaaij Cumar Barrow Gaafow;

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiiyo buug keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keyd ka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Xaaji Cumar Barrow Gaabow ama qof isla isaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo laga sugaayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegney.

MUQDISHO, 11|9/76

GUDDOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 433

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangika; Ganacsiga Ummadda Laanta 2aad (Ex port Said)

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9/9|65 N. 2; iyo lumidda buuga kaydka ...... Lam. 5737 oo ay ku qoran tahay Sh. SO. 12.012,70, kuna soo baxay Bankiga kor ku tilmaaman.-

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiiyo buug keyd kadib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamuud Diiriye Muuse ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo laga sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

MUQDISHO, 11|10/76

GUDDOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
*(Cali Xaaji Nuur Shimbireeri)*

L. 434

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga; Ganacsiga Ummadda Laanta 1aad;

HADDU ARKAY: Qod. 69 D.9/9|65 N. 2; iyo lumidda Buugga keydka lam. 10539; oo ku taallay Shs. 4.400/= iskana lahaa Aaden Xasan Cabdi;

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiiyo buug keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Aadan Xasan Cabdi ama qof isla isaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo laga sugaayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

MUQDISHO, 16/12|76

GUDDOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR
*(Cali Xaaji Nuur Shimbireeri)*

L. 435

# MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Xaaji Cutiye Mireh Sugulleh iyo Bakiga Ganacsiga Ummadda

AMAR L. 17/76

Labada dhinac ee kor ku qorani waxay Maxkamadda keeneen sida hoos ku qoran:

Xaaji Cutiye Mireh Sugulleh waxay Maxkamadda keentay Arji ay ku caddeynayso in jeeg wareegto ah kuna qoran Magaceeda Lam. yahay 09198 taariikhdiisuna tahay 4.10.75, sidaa awgeed waxayna codsanaysaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, isaguna Maxkamadda wuxuu keenay taariikhdu markay ahayd 21.2.76 warqad Lam. yahay 60959 taas uu ku caddeynayo in uu lumay Jeeg wareegto ah (J.W.Lr.09198) kuna qoran tahay lacag dhan Sh. SO. 4.000, jeegaas oo ku qoran Xaaji Cutiye Moreh Sogulleh, lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga Laanta Hargeysa taariikhdu markay ahayd 4.10.75, uu ogeysiiyey laamahooda oo dhan in aanay bixin lacagta ku qoran jeegga Lumay. Sidaas darteed markii aan eegay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay Qodobka 27 xeerka Lam. 2 soona baxay 9.9.65 iyo Qodibka Lam. 69 isla xeerkaas.

WAXAA LA AMRAYAA:

1. In uu socon karin jeegga Lam. kor ku qoran yahay laga bilaabo maanta.

2. In lagu qoro amarkaas faafinta rasmiga ah.

3. In lacagtaas ah Sh. SO. 4.000 Bankigu siiyo Arjilaha magaciisu ujeeddada ku qoran yahay muddo ku siman 30 (soddon) Casho kadib, marka lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

20kii Juun. 1976.

Guddoomiyaha Maxka. Gobolka Hargeysa
*(Xasan Xaaji Yuusuf)*

L. 436